

XUKUUMADDA SOOMAALIYA

Sharciga 29 Disember 1958, lamba. 31 rep.

Hagaajinta xil-haynta Xaafiiska Guddoonka Golaha Xeer-dejinta iyo gunnada xaqiinta Xildhibaanada.

MAAMULAHA

Marka uu arkay oggolaashaha Golaha Xeer-dejinta;

Wuxuu soo saarayaa oo ansixinayaana

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Xaafiiska Guddoonka Golaha Xeer-dejinta ee ku xusan qod. 5 ee Xeerka 5 Jannaayo 1956, lr. 1, wuxuu xilka sii haynayaa ka dib marka la kala diro Golaha Xeer-dejinta sii baxaya illaa ay isaga yimaadaan Golaha Xeer-dejinta imaanaya.

Qod. 2

Waxaa loo aqoonsaday in ay leeyihiin Xildhibaanada, xubnaha Xeer-dejinta sii baxaya, gunno xaqiin ah oo u dhiganta lacag saddex bilood.

Kharashka la xariira arrintaas waxaa laga bixinaya madaxa (capitol) hawl maaliyeedka 1959.

Qod. 3

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya. Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka waxaana lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga. Cid kastana waa ku waajiba in ay u hoggaansato iyo loo addeeco ka Xeer ahaan Soomaliya.

Taariikhda Muqdisho, 29 Disember 1958.

Maamulaha

Mario Di Stefano

Cabdullaahi Ciise Maxamuud